

Guddiga Maamulka Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban

Kulanka 53aad ee 21ka Sebteembar 2021 – Fogaan-arag

Arrimaha Maaliyadda: Kulanka ayaa looga hadlay dadaallada Dowladda Federaalka Soomaaliya ee kordhinta dakhliga gudaha, gaar ahaan dakhliga ka soo xarooda adeega duulista hawada. Wasiirka Gaadiidka iyo Duulista Hawada iyo Maareeyaha Guud ee Hay'adda Duulista Hawada Soomaaliya ayaa ka qeyb galay kulanka, waxayna soo jeediyeen warbixin ku saabsan halka ay mareyso diyaarinta tartanka qandaraas lagu ururinayo deymaha ururay ee dakhliga ka soo xarooda isticmaalka hawada Soomaaliya iyo nidaamka cusub ee lagu soo rogayo khidmada degidda iyo kicidda diyaaradaha.

Guddiga Maamulka Maaliyadda wuxuu si joogto ah ugu biiriyaa talooyin istiraatiiji ah oo ku saabsan qabashada tartan qandaraas ah oo waafaqsan Xeerka libka Qaranka iyo inuu gacan ka geysto helidda kaalmada farsamo ee lagama maarmaanka u ah diyaarinta dukumintiyada tartan-furan iyo qabyo-qoraalka heshiiska. Kulanka ayaa sidoo kale looga hadlay maareynta dakhliga kalluumaysiga, ruqsad siinta iyo bixinta khidmadaha VMS iyo IOTC si loo bixiyo ruqsadda kalluumeysiga ee 2021.

Heshiyada iyo Qandaraasyada: Kulanka ayaa looga dooday Qoraalka Guddigga Maamulka Maaliyadda ee ka talo-bixinta ku saabsan casharadii laga bartay tartankii furnaa ee la qabtay 2021 ee raashinka iyo shidaalka hey'adaha amniga. Dib -u -eegistu waxay aqoonsatay dhowr arrimood oo ah caqabado ku aadan habsami u-hergelinta libka Qaranka, waxayna soo jeedisay talooyin ku saabsan sida loo wanaajin karo hannaanka tartan hufan. Waxaa la isla gartay, baahida loo qabo in la sahamiyo sida u tartamayaasha iibka qaranka loogu fidin karo tababaro la xiriira qaabka ka qeyb galka tartanka-furan iyo habka diyaarinta dukumintiyada tartanka, si kor loogu qaado tayada iyo hufnaanta tartanka.

Wasiirka Gaashaandhigga Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa ka qeybgalay kulanka, wuxuuna ka warbixiyey caqabadaha hortaagan hergelinta qandaraasyada raashinka ciidanka qaranka, kadib markii uu koror ku yimid qiimaha wax soo dhoofinta ee maraakiibta caalamiga ah. Kulanka ayaa la isku afgartay in si wadajir ah loo falanqeeyo arrintaan qiima koroka, si go'aan looga gaaro. Sidoo kale, kulanka ayaa waxaa looga dooday habka loo hergelin karo tartanka qandaraaska raashinka ee Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugida Qaranka.

Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021: Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay ka shaqeyneysaa dhammaystirka Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021, ugu dambeyn dhammaadka Sebteembar.